# Bixiyaha - Sida loogu daro ama loo beddelo PIN-kaaga ama lambarkaaga sirta

**Ujeeddada:** Hagahan waxa uu siiyaa tilmaamo tallaabo-tallaabo ah bixiyeyaasha ama macaamiisha si ay ugu daraan ama u beddelaan PIN-kooda ama lambarkooda sirta (Lambarka Aqoonsiga Shakhsiyeed) ee AMA PTC DCI.

* PIN ama lambar sireed cusub ayaa lagu dari karaa marka adeeg bixiyaha ama macaamiishu ay ku cusub yihiin nidaamka oo ay jeclaan lahaayeen inay isticmaalaan PIN ama lambar sired si ay u galaan abka mobaylka, ku soo shaqo galidda khadka taleefanka, ama xaqiijinta wakhtiga shaqo ka bixidda.

* Beddelka PIN-ka ama lambar sireedka waa marka isticmaaluhu uu horey u haystay PIN-ka ama lambar sireedka oo uu jeclaan lahaa inuu ku beddelo PIN-ka ama lambarka sirta 4ka-god ah lambar cusub ah.

**Fiiro gaar ah: Mar kasta oo dib-u-dajinta xaqiijinta la sameeyo, PIN-ka ama lambar sireedka waa in la cusboonaysiiyaa.**

**Natiijada:** Macaamilka ama adeeg bixiyayaasha ayaa awoodi doona inay ku daraan ama beddelaan PIN-kooda ama lambar sireedkooda si ay u isticmaalaan marka ay gelayaan AMA PTC DCI abka moobaylka AMA PTC DCI ama khadka guriga.

## Talaabooyinka lagu dhamaystirayo habraaca:

| # | Tilmaan | Sawir shaashadda/Linkiga shaqeynaya |
|---|---|---|
| 1 | Ku gal OR PTC DCI magaca isticmaalaha iyo furaha sirta aad leedahay. | **Linkiga Mareegta:** [orptc.dcisoftware.com](orptc.dcisoftware.com)   |

| | | |
|---|---|---|
| 2<br><br>3 | **Tilaabbooyinka ku daridda PIN-ka ama lambar sireedka:**<br><br>Xagga bogga hore, guji magacaaga isticmaalaha ee ku yaal geeska sare ee midig ee bogga.<br><br>Guji 'Dejinta (Settings)' |  |
| 4<br><br>5<br><br>6<br><br>7 | Guji 'ADD NEW PIN'.<br><br>geli PIN 4-lambar ah.<br><br>Markale geli isla PIN-ka 4-lambar ah.<br><br>Guji 'Add New Pin'. |  |
| 8 | Digniintan ayaa soo bixi doonto<br>" Ma hubtaa inaad inaad rabto inaad baddesho PIN-ka (Are you sure you want to add new pin?)"<br>Guji 'Yes'<br><br>Xariiq cagaar ah ayaa soo muuqan doono, 'Pin-ka si guul leh ayaa loogu daray (Pin Added Successfully!)'. |  |

| | | |
|---|---|---|
| | **Tallaabooyinka lagu baddelo PIN-ka ama lambar sireedka:**<br>Raac tillaabada 1 ilaa 3 ee sare, ka dib. |  |
| **4.A** | Guji 'BEDDEL PIN(CHANGE PIN)' | |
| **5.A** | Geli eraygaaga sirta ah | |
| **6.A** | Guji 'Hubi (Verify)' | |
| **7.A** | Geli PIN-ka ama lambar sireedka cusub oo 4-god ah. |  |
| **8.A** | Markale geli isla PIN-ka ama lambar sireedka 4-god ee cusub | |
| **9.A** | Guji 'Baddel pin-ka (Change Pin)' | |
| | Digniintan ayaa soo bixi doonto "Ma hubtaa inaad rabto inaad ku darto pin cusub (Are you sure you want to add a new pin)?" |  |
| **10.A** | Guji 'Yes'. | |
| | Xariiq cagaar ah ayaa soo muuqan doono, 'Si guul leh ayaa Pin-ka ama lambar sireedka loo beddelay (Pin Changed Successfully)!'. |  |